## Sida looga ilaaliyo naftaada iyo kuwa aad jeceshahay musuq-maasuqa Xajka

**Samee daraasaddaada.** Tigidh ha goosan adiga oo aan samayn baadhitaano aasaasi ah oo la xidhiidha wakaaladdaada socdaalkaaga/dalxiis abaabulahaaga. Talo uu kuu soo jeediyo saaxiib ama xubin qoyska ka mid ahi kuuma ballanqaadi karto run-ahaanshaha shirkadda. Gal internet-ka oo samee baadhitaan la xidhiidha shirkadda socdaalka si aad u aragto in cid kale ka faallootay adeegyadooda. Baadhitaan ku samee in shirkaddu aqoonsi ka haysato Wasaaradda Xajka (Ministry of Hajj) adigo geleya: **www.hajinformation.com/hajj_agents.php**

**Hubi in shirkaddaada socdaal ay xubin ka tahay iskaashato ganacsi oo la aqoonsan yahay sida ABTA.** Dhammaan xubnaha ABTA waa inay raacaan xeerar anshax ayna buuxiyaan shuruudo adag oo ku soo biiriddeed, taas oo yaraynaysa fursadda ay ku soo biiri karaan shirkaddo musuqmaasuq ah. Waxaad xubinimada ABTA ee shirkaddeed ka xaqiijin kartaa bogga: **http://abta.com/go-travel/before-you-travel/find-a-member**

**Haddii aad goosanayso qorshe duulimaad ku salaysan hubi in shirkadaada socdaalku ay tahay Liisan Abaabul Socdaal Cirka ah (Air Travel Organisers' Licensing-ATOL) oo ay ilaaliyaan Maamulka Duulimaadada Hawada (Civil Aviation Authority - CAA).** Haddii shirkadda socdaalku xidhanto inta aad ku sugan tahay Sacuudi Carabiya, waa in weli tigidhkaagii duulimaadka ee soo noqodku kuu shaqeeyaa, laakiin waxay u badnaan doontaa in lagu weydiiyo inaad bixiso lacagtii degganaanshahaaga. Kharashkan waxaad ka dalban kartaa CAA iyo sidoo kale lacag-celin haddii aadan weli socdaalin. Waxaad ATOL ka baadhi kartaa: **www.caa.co.uk**

**Wax walba qoraal ahaan ku hel.** Mar walba waa inaad shuruudaha ku heshaa qoraal ahaan maadaama ay tani faahfaahin ka bixinayso heshiiska aad la galayso shirkaddaada socdaalka. Hubi in faahfaahinta duulimaadkaaga, meesha aad ku dagayso iyo fiisahaaga Xajku ay sax yihiin. Samee/aasaas raad-raac warqadeed oo la jeegarayn karo, haysana diiwaanada macaamilaadka dhaqaale.

**Shirkadda socdaalka lacagta ha ku siin kaash ahaan ama toos ha ugu shubin koonto bangi oo shakhsi gaar u leeyahay.** Shirkadaha sharciga ah intooda badan waxay leeyihiin qaab bangi oo aqbala kaadhadhka kaydka ama kaadhadhka daynta (credit or debit cards). Haddii aad bangi ugu shubto ama aad kaash ahaan ku bixiso oo markaa ka dib ay shirkaddii noqoto mid musuqmaasuq ah waxay xaqiiqdii noqon doontaa mid aan suurtogal ahayn inaad lacagtaadii dib u hesho.

## Hadii aad tahay dulmane musuqmaasuq Xaj

Fadlan dhibaatada haku keliyaysan ama ha dareemin inaad ceeb u aragto inaad soo bandhigto. Aad ayay muhiim u tahay inaad dembiga u soo sheegto **Talaabo ka qaadidda Musuqmaasuqa (Action Fraud), telefoonka 0300 123 2040** ama bogga **www.actionfraud.police.uk**

Dhammaan warbixinada la soo gudbiyo waxaa ka fiirsan doona Ururka Sirdoonka Musuqmaasuqa Qaranka ee Booliiska Magaalada London, waxaana loo isticmaali karaa in lagu aqoonsado dembiilayaasha joogtada ah wuxuuna aasaas u noqon doonaa baaritaanada booliiska ee ay sameeyaan ciidamada deegaanku. Keliya marka la ogaado qiysaas-cabbireedka xaqiiqada ah iyo nooca khatarta ayaa fulinta sharcigu si waxtarleh wax uga qaban karaan dadka musuqmaasuqa samaynaya kuwaas oo dhibaatada ugu badan ku haya bulshada Muslimka ah.

Rashid Mogradia, CEO of the Council of British Hajjis said (CEO Golaha Biritishka ee xajka ayaa yidhi):

*"Inkasta oo inta badan qorsheeyaasha safarada Xajku ay yihiin kuwo bixiya adeeg aad u wanaagsan, hadana waxaa jira kuwo doonaya inay qariibaan sumcaddaas wanaagsan ee wakaaladaha hawlahaas, iyagoo doonaya inay xujayda Muslimka ah ee Biritishka ah ka musuqmaasuqaan kaydkii noloshooda. Xujaydu waa inay hubiyaan inay tigidhka ka goostaan safar qorsheeyayaal sumcad iyo liisan leh. Waxaanu bulshada ku dhiirigelinaynaa inay taageeraan hawsha amaanta mudan ee ay qabtaan Booliiska Magaalada London ee la xidhiidha wax ka qabadka Musuqmaasuqa Xajka oo ay u gudbiyaan dadka musuqmaasuqa sameeya Talaabo ka qaadidda Musuqmaasuqa (Action Fraud) si caddaaladda loo hor keeni karo."*

Wixii warbixinno dheeraad ah ee la xidhiidha musuqmaasuqa Xajka booqo:
**www.cityoflondon.police.uk/CityPolice/hajjfraud**
**www.cbhuk.org**

Wixii warbixinno dheeraad ah ee la xidhiidha Xajka booqo:
**www.hajinformation.com**

CITY of LONDON POLICE
ActionFraud Report Fraud & Internet Crime actionfraud.police.uk
CBH UK The Council Of British Hajjis

# Xaj

Ha u ogolaan kuwa musuqmaasuqa sameeya inay baabi'yaan soo xajiyiddaadii



# Musuqmaasuqa Xajka

Sannad walba in ka badan labo milyan oo Muslimiin ah ayaa xusa Xajka iyagoo xajinaya oo aadaya Makka kaas oo ah isu-imaatinka dad ee sannadlaha ah ee aduunka ugu weyn. Dadkaa aadka u faraha badan waxaa ku jira kumanaan ah muwaadiniin UK, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ahi ay lacag kaydsanayeen sannado badan, iyagoo og in uu safarkani iyaga u noqon doono safar nolosha laga yaabo inuu hal mar ku soo maro.

Nasiibdaro marka Xajku soo dhowaado waxaa jiri doonta tiro badan oo Muslimiin ah oo lacag ka bixiyey qorsheyaal iyaga iyo qoyskooda ah, ka dibna ay ogaadaan in riyadoodii fiicnayd ay ka burburiyeen dad musuqmaasuq ah.  Qaar waxay tagaan Sacuudi Carabiya ka dibna waxay ogaadaan in goobtii deegaan ee loo sheegay in loo qorsheeyey aanay ahayn mid jirta, halka ay qaar kalena ka ogaadaan in gebi ahaanba safarkoodii uu ahaa khiyaano ay sameeyeen safar abaabulayaal aan sharci ahayn oo la baxsaday kumanaan gini oo lacagtoodii ah.

Iyagoo ka jawaabaya khatartan joogtada ah ee ku wajahan Muslimiinta qorshaynaya inay aadaan Makka, Booliiska Magaalada London , oo ah booliiska ugu horeeya ee la dagaalanka musuqmaasuqa wuxuu wadaa olole qaran oo ka hortag musuqmaasuq Xaj.



Taliye Steve Head, oo ka socda Booliiska Magaalada London ayaa yidhi:

> *“Musuqmaasuqa Xajku waa dembi aad u waxyeelo badan, kaas oo sannad walba ka dhaca Muslimiinta wax noqon lahaa fursaddoodii keliya ee ay ku soo gudan lahaayeen Xajka oo ku tegi lahaayeen Makka. Booliiska Magaalada London  wuxuu u heelan yahay inuu bulshada Muslimiinta ah kala shaqeeyo sidii loo fahmi lahaa miisaanka xaqiiqada ah iyo nooca musuqmaasuqa Xajka, si dadka looga badbaadiyo inay ku dhacaan dulmin lagu sameeyo iyo in ay ka caawiyaan kuwa la dulmiyo iyo inay dabagal ku sameeyaan oo sharciga hor keenaan dadka musuqmaasuqa sameeya kuwaas oo lacag ay dembi ku galeen hela iyagoo burburinaya riyada wanaagsan ee qof kale.”*

## Sidee ayuu u dhacaa musuqmaasuqa Xajku



Muslimiinta raadinaya qorshaha ugu wanaagsan ee u safridda Makka, iyagoo ka raadinaya bulshada agagaarkooda iyo internet-ka oo ah mid sii kordhaysa ayaa waxaa soo jiita qorshayaal – duulimaadyo, goobo deegaan, fiisayaal – kuwaas oo ah qiimayaal wanaagsan. Abaabulayaasha qaar ayaa xayaysiiya qiime dhimis aad ah. Shakhsiyaadka waxaa laga dalbaa inay bixiyaan lacag kaash ah ama inay sameeyaan inay bangiga toos ugu bixiyaan, safarkooda ka hor, waxaana loo sheegaa inay tigidhkooda iyo dukumeentiyadooda socdaal heli doonaan xili ku dhow taariikhda safarkooda. Qaar ka mid ah weligoodba ma soo gaadhaan.

Mohammed, 36, oo ka yimi Birmingham waxaa musuqmaasuq Xaj kaga khasaartay £4,500. Ceeb aad ah ayuu dareemay, laakiin waxaa muhiim ahayd inuu usoo gudbiyey Talaabo ka qaadidda Musuqmaasuqa:

> *“Markii hore aad ayaan taxadar u samaynayey, si aan u hubiyo waxaan keliya oo tix-galinayay qorshayaal ay bixinayaan shirkaddo socdaal oo sharci ah. Nasiibdaro, waxaan u baydhay boggag internet oo bixinayey qorshayaal soojiidasho leh, waxaana layga dhaadhiciyey inaan ku kalsoonaado si ay ii siiyaan soo xajiyin wanaagsan oo aan Makka ku tago. Markii xiligii Xajku soo dhowaadey wax tigidh ah maan helin, wakiilkayiina wuxuu joojiyey inuu telefoonadayda igu soo celiyo, ilaa aan markii dambe gaadhey xili aan aqoonsaday inaan ku dhacay dulmin dembi aad u xun.”*



Ilaa

**25,000**

oo Muslimiin Biritish ah ayaa sannad walba u socdaalka inay soo Xajiyaan

Muslimiinta Biritishka ah waxay ku bixiyaan Xajinta sannad walba

**£125 million**

Booliisku waxaa loo soo gudbiyey dulmanayaal khasaaray  xaddi lacageed oo u dhexeeya

**£1,000-£33,000**

**42**

Waa celceliska da’da ee dulmanayaasha Xajka

Golaha Biritishka ee Xaajiyada wuxuu ku qiyaasay in dadka dulmanayaasha ah ee la soo xidhiidha Talaabo ka qaadidda Musuqmaasuqu uu yahay tiro yar oo ah

**3%**